

XEER n. 96 rep.

**MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA**

**XOGHAYAHA GUUD**

WAXA LA AQOONSADAY xeer 4 nobembar 1951, n. 1301, kaas oo xeerinaya ilaalinta heshiiska dulka soomaliya ee Talyaanigu maamulo siinayana fulin buuxda,

IYADOO LA TIXGELINAYO haddii ay dhacdo in uu maamuluhu maqnaado fasax awgiis shaqadiisa waxa qabanayo Xoghayaha Guud sida uu qabo qodob n.47 ee soo baxay 22 Luuliyo 1950;

WAXAA LA GARTAY inay lagama maaarmaan tahay in la asaaso dugisga qorista macluumaadka;

MARKI UU DHAGEYSTAY Golaha Dhexe ee Dugsiyada;

**WUXUU XEEREYAY**

**Qod. 1**

Dugsi barashada makiina graacidda macluumaadka ayaa laga furay magaalada Muqdisho kaas oo ay ku jiraan dowrooyin billow ah iyo kuwo horumarsan.

**Qod. 2**

Maareeyaha ayaa xeer ku soo saari doonaa xeer nadaamiye.

**Qod. 3**

Macallimiinta isla dugsi wax ka dhiga waxaa soo xulaya maamulaha dugsi dhexe ee Soomaliyed kana dhex xulaya dadka leh xirfadaha makiina garaacista

Macallimiintan waxa la siiyaa lacag dhan Sh.So. 5 saacaddii uu cashar siiyo fasalkaba.

**Qod. 4**

Kharashaadka la xiriira ka shaqaysiinta dugsi kor ku tilmaaman waxaa lagu dallaci doonaa qodobka 67 ee sannad maaliyadeedka hadda socda iyo qodobbada u dhigma ee sannad maaliyeedyada soo socda. Kharashaadka la xiriira gunnooyinka ku tilmaaman qodobka hore waxaa lagu dallici doonaa qodobka 67mar labaad kaas oo ka mid ah xisaab maaliyadeedka ee sannad maaliyadeedka hadda socda iyo qodobbada u dhigma ee sannad maaliyeedyada soo socda.

Muqdisho, 23 maajo 1952.

p. MAAREEYE  
**Canino**